

Cudurada ka dhasha cayayaanka looyaqaano vector-ka waa cuduro ay keento fayrasyo, bakteeriya, ama cayayaanka gudaha jirka ku noll waxaana ku fida vectors gaar ah sida caarada ama kaneecada. Ka ilaali qaniinyada si ay u badbaado.

Sida Looga Ilaaliyo Naftaada Kutaanka

Kahor Inta Aadan Bannaanka Aadin

1. Xiro fanaanad gacmo dhaadheer, surwaal, oo isticmaal sunta lagu buufiyo cayayaanka ee EPA ay ogolaatay.
2. Geli surwaalkaaga sharabaadadaada, shaarkaagana surwaalkaaga geli.



Kadib markaad Gudaha soo gasho

1. Ka hubi jirkaaga oo dhan iyo xayawaankaaga rabaayada ah caarada.
2. Ku qubeyso laba saacadood gudahood marka aad bannaanka joogto.
3. Haddii aad aragto kutaan, isla markiiba banaanka usaar.
4. Dharka ku qallaji kulayl aad u sarreeya 10 daqiiqo si aad u disho wixii kutaan ah.

Wac dhakhtarkaaga haddii aad isku aragto finan, qandho, madax-xanuun, jaahwareer, murqo xanuun, daciifnimo, qoorta oo ku adkaata, ama calaamado kasta oo aan caadi ahayn ka dib markaad kutaanka ku qaniino.

kutaanka eeyaha iyo kutaanka deerada ayaa ah kutaanka ugu badan Maine?

Kutaanka deerada waxa ay xanbaarsan tahay jeermis naga dhigi kara kuwo jiran, oo ay ku jiraan Anaplasmosis, Babesiosis, iyo Lyme Disease.

Sida Looga Ilaaliyo Naftaada Kaneecada

- **Isticmaal qaboojiyaha iyo shaashadaha** si aad kaneecada uga ilaaliso gurigaaga.
- **Hubi inaad daadiso biyo kasta oo taagan**, sida qubayska shimbiraha, sababtoo ah kaneecada ayaa ukumo ku dhex jirta biyaha.
- **Isticmaal buufinta cayayaanka ee ay ogolaatay EPA** marka aad wakhtiga dibadda ku qaadanayso.
- **Xiro fanaanad gacmo dhaadheer iyo surwaal** si aad maqaarkaaga u ilaaliso.

Wac dhakhtarkaaga haddii aad leedahay qandho, caabuuq, dareen-celin xasaasiyad daran, ama calaamado aan caadi ahayn ka dib qaniinyada kutaanka



Sida Looga Ilaaliyo Naftaada Cayayaanka Baal madowga buuniga ah

- **Iska ilaali taabashada** diirka ama shabaqooda si aad uga hortagto cuncunka maqaarka.
- **Xiro dhar ka hortag ah**, sida gacmo-gashiyo dhaadheer iyo galoofyada, markaad ka shaqaynayso aagagga leh aboor-ka browntail.
- **Caawinta** aboorayaasha browntail, sida ka saarida shabakadaha si badbaado leh ama ka warbixinta dhibaatada, booqo [Waaxda Beeraha ee Maine websaydka](#) – ka Ilaalinta iyo Kaymaha: Banaanka ubixi Cayayaanka Browntail

Baro Khatarta

Aboorayaasha Browntail iyo buulkooda waxay sababi karaan cuncun maqaarka iyo arrimaha neefsashada. Ka fogow xiriirka oo samee taxaddar si aad ammaan u ahaato.



Baadh koodka QR si aad u booqato shabakada Maine CDC oo aad wax badan uga barato faleebada iyo cudurada vectorborne.